



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.354

TAARIIKH:01-DA DISEEMBER, 2024

MAGACAABIS XUBNAHA GUDDIGA MADAXA BANNAAN EE
DOORASHOYINKA QARANKA & SOOHDIMAHA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY:

Qodobada 87^{aad} iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY:

Qodobada 47^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY:

Sharci Lr.26, ee soo baxay 21/11/2024, ee ku saabsan
Sharciga dhisidda guddiga madaxa bannaan ee
doorashooyinka Qaranka iyo soohdimaha.

MARKUU ARKAY:

Sharci Lr.28, ee soo baxay 23/11/2024, ee ku saabsan
Sharciga doorashooyinka Qaranka ee J.F.S.

MARKUU ARKAY:

Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee
summaddeedu tahay XGGSH/639/B11/24, ku
taariikheysan 27/11/2024, ujeeddaduna tahay Soo
Gudbin Ansixinta Xubanaha Guddiga Madaxa-
Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo
Soohdimaha.

MARKA UU TIXGELIYAY:

Taariikh nololeedka musharixiinta loo soo jeediyay
in ay kamid noqdaan Guddiga Madaxa bannaan ee
doorashooyinka Qaranka iyo soohdimaha.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1^{aad}

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay Guddiga
Madaxa-Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha, magacyadooduna waa sida
hoos ku xusan:

Lr.	Magaca
1.	Cabdikariim Axmed Xasan
2.	Saadiq Abshir Garaad



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

3.	Avv. Maxamed Cabdiraxmaan Aadan
4.	Yuusuf Cabdiqaadir Maxamed-Bafo
5.	Cumar Abuukar Cumar
6.	Farxiya Maxamed Yuusuf
7.	Dr. Cumar Jaamac Maxamed
8.	Faarax Cabdi Xasan
9.	Sahro Diiriye Muuse
10.	Cabdullaahi Salaad Yaroow
11.	Maxamed Amiin Xasan Cabdullaahi
12.	Cabdi Cadow Maxamed
13.	Cabdishakuur Abiib Haayir
14.	Khaalid Ibraahim Ismaaciil
15.	Aamina Sheekh Cismaan Maxamed
16.	Naasir Maxamed Shire
17.	Cabdiraxmaan Cabdullaahi Shaafici
18.	Maxamed Cumar Ismaaciil


Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.



Madaxweynaha J.F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud





Ref: XGGSH/ 639 /B-11/24 :الرقم

التاريخ: Mogadishu, November 27, 2024

**QARAAR KA BAARLAMAANKA JFS
KU SAABSAN**

**ANSIXINTA XUBNAHA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE
DOORASHOYINKA QARANKA IYO SOOHDIMAHA.**

Muqdisho, 27^{ka} November 2024

BAARLAMAANKA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Markuu Arkey: Qodobka 55aad ee Dastuurka JFS iyo Qodobka 7aad ee Xeerka lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.

Markuu Arkey: Soojeedinta R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Lam. XRW/354/11/2024 ee 26/11/2024, kuna saabsan “Go’aan Gole ee Soo gudbinta Magacaabidda xubnaha Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha;

Markuu Arkey: Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha oo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare oo wadajira ay ku ansixiyeen fadhigooda 8aad ee Kalfadhiga 5aad BJFS.

Markuu Arkay: Taariikh nololeedka musharaxiinta loo soojeediyey in ay ka mid noqdaan Guddiga Madaxa-bannaan Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha;

Asaga oo Kulansan Kalfadhiga 5aad, kulankiisa 11aad Wadajirka ah ee Labada Aqal BJFS, taariikh 27 Nofeember 2024, goobjoogna ay yihiin 175 Xildhibaan, waxa uu u codeeyay xubnaha Guddiga Madaxa-Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha sidatan:

Kooramka : 175

Oggol : 169

Diiday : 6

Aamustay : 0

Magacyadda Xubnaha Guddiga Madaxa-Banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

1. Cabdikariim Axmed Xasan;
2. Saadiq Abshir Garaad;
3. Avv. Maxamed Cabdiraxmaan Aadan;


Tell: +252 616641550/+252 618153111


E-mail. speaker@parliament.gov.so

Website: www.parliament.gov.so

4. Yusuf Cabdiqaadir Maxamed -Baafo;
5. Cumar Abuukar Cumar;
6. Farxiya Maxamed Yusuf;
7. Dr. Cumar Jaamac Maxamed;
8. Faarax Cabdi Xasan;
9. Sahro Diiriye Muuse;
10. Cabdullaahi Salaad Yarow;
11. Maxamed Amiin Xasan Cabdullaahi;
12. Cabdi Caddow Maxamed;
13. Cabdishakuur Abiib Haayir;
14. Khaalid Ibraahim Ismaaciil;
15. Aamina Sh. Cusmaan Maxamed;
16. Naasir Maxamed Shire;
17. Cabdiraxmaan Cabdullaahi Shaafici;
18. Maxamed Cumar Ismaaciil.

Waxaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga codsanayaa in uu go'aanka Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku oggolaado Xeer Madaxweyne kuna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 90 (f) ee Dastuurka KMG iyo Qodobka 29aad ee Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.


M. ne Sheekh Aadan Maxamed "Sheekh Aadoobe"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka





The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister


Tixraac: XRW/ 354 /11/2024

Taariikh: 26/11/2024

→ Ku: Guddoomiyeyaasha Labada Gole ee Baarlamaanka JFS
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Muqdisho
Muqdisho

**UJEEDDO: GO'AAN GOLE EE SOOGUDBINTA "MAGACAABIDDA
XUBNAHA GUDDIGA MADAXABANNAAN EE
DOORASHOYINKA QARANKA IYO SOOHDIMAHA".**



Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97^{aad} faqrada (1) iyo (2); Qodobka 99^{aad} faqrada (a), (b), (f), iyo (g); Qodobka 100^{aad} faqrada (a) iyo (d); iyo Qodobka 112^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee JFS;

Markuu arkay: Cutabka 4aad, gaar ahaan qodobbada 55^{aad} ilaa 60^{aad} ee Dastuurka dib-u-eegista lagu ansixiyay, Madaxweynahuna xeerku soosaaray (Sharci Lr. 24 ee 31 Maarso 2024);

Markuu arkay: Qodobka 7^{aad} iyo 8^{aad} Xeerka Dhisidda Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha;

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay WAGF&D/XW/ 2740 /2024 kuna taariikheysan 26/11/2024 ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka, iyo Dib-u-heshiisiinta, kuna saabsan soojeedinta Magacaabidda Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.

Markuu arkay: Taariikh nololeedka, aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin xubnaha la soojeediyay;

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.42.100.11.24 ee 26/11/2024, kuna saabsan soogudbinta "Magacaabidda Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;



Markuu tixgaliyay: Baahida loo qabo in la dhiso Guddiga si loo qababto, loona maamulo doorashooyin qof iyo cod ah oo Dalka oo dhan ka qabsoomta.

Waxaa uu meelmariyay:

Oodobka 1^{aad}:

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.42.100.11.24** ee **26/11/2024**, kuna saabsan soogudbinta “**Magacaabidda Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha**” oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Oodobka 2^{aad}:

Magacaabid

Waxaa xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha loo magacaabay xubnaha hoos ku xusan:

1. Cabdikariim Axmed Xassan;
2. Saadiq Abshir Garaad;
3. Avv. Maxamed Cabdiraxmaan Aadan;
4. Yuusuf Cabdiqaadir Maxamed-Baaf;
5. Cumar Abuukar Cumar;
6. Farxiyo Maxamed Yuusuf;
7. Dr. Cumar Jaamac Maxamed;
8. Faarax Cabdi Xasan;
9. Sahro Diiriye Muuse;
10. Cabdullaahi Salaad Yaroow;
11. Maxamed Amiin Xasan Cabdullaahi;
12. Cabdi Cadow Maxamed;
13. Cabdishakuur Abiib Haayir;
14. Khaalid Ibraahim Ismaaciil;
15. Aamina Sh. Cusmaan Maxamed;
16. Naasir Maxamed Shire;
17. Cabdiraxiim Cabdillaahi Shaafici;
18. Maxamed Cumar Ismaaciil.



Qodobka 3^{aad}:


Dhaqangal

Ra'iisul Wasaaraha JFS waxaa uu Baarlamaanka JFS Labadiisa Aqal ka **codsanayaa in ay ansixiyaan xubnaha qodobka 2aad ku xusan**, iyaga oo dhammaystiraya habraaca la xariira **Magacaabidda Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha** si waafaqsan **Qodobka 57^{aad} (1) ee Dastuurka** dib-u-eegista lagu ansixiyay Cutubkiisa 4aad, si Madaxweynaha JFS xeer ugu soosaaro marka oggolaado.



Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS





Federal Republic of Somalia
Ministry of Interior, Federal Affairs & Reconciliation
Office of the Minister

TIX:WAGF&D/XW/ /2024

Tr: Nov 26 , 2024

Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

=MUQDISHO=

Ujeeddo: Soo gudbin murashixiinta Xubnaha Guddiga Madaxa bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

Mudane Ra'iisul Wasaare;

- Iyadoo la fulinayo Qodobka 7^{aad}, faqradiisa 1^{aad} ee Xeerka Dhisidda Guddiga Madaxa bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha Lr.26 ee soo baxay November 21, 2024.
- iyadoo lala soo tashaday Dowlad Goboleedyada, Gobolka Banaadir, SSC-Khaatumo, Qaybaha bulshada rayidka iyo hay'adaha ay khuseeyso;
- Waxaa lagu soo xulay aqoontooda iyo kartidooda 54 xubnood oo ka mid ah dadkii ku soo baxay latashiyadii la sameeyay, ka dibna laga sii xulay 18 xubnood oo soo buuxiyay shuruudaha ku xusan qodobka 8^{aad} ee Xeerka Dhismaha Guddiga Madaxa bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.
- Annagoo tixgelinnay qoondada Haweenka iyo isu-dheellitirnaanta qeybaha kala duwan ee Bulshada,

Waxaan halkan ku soo gudbinaynaa 18^{ka} xubnood oo soo buuxiyey shuruudaha ku xusan qodobka 8^{aad} ee Xeerka Dhismaha Guddiga, xubnahaas oo aan u soo xulnay in ay noqdaan murashaxiinta Guddiga Madaxa bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.

waxayna kala yihiin: -

- 1) Cabdikariim Axmed Xassan
- 2) Saadiq Abshir Garaad
- 3) Avv. Maxamed Cabdirahmaan Aadan
- 4) Yusuf Cabdiqaadir Maxamed-Bafo
- 5) Cumar Abuukar Cumar
- 6) Farxiyo Maxamed Yusuf
- 7) Dr. Cumar Jamac Maxamed
- 8) Faarax Cabdi Xasan
- 9) Sahro Diiriye Muuse
- 10) Cabdullahi Salaad Yaroow
- 11) Maxamed Amiin Xasan Cabdullahi
- 12) Cabdi Cadow Maxamed
- 13) Cabdishakuur Abiib Haayir
- 14) Khaalid Ibrahiim Ismaaciil
- 15) Aamina Sh. Cusmaan Maxamed
- 16) Naasir Maxamed Shire
- 17) Cabdiraxiim Cabdillahi Shaafici
- 18) Maxamed Cumar Ismaciil

Sidaas darteed, waxaan idinka rajeyneynaa in aad naga aqbali doontaan soo jeedintaan oo Golaha Wasiirradu ansixiyo xubnaha sare ku xusan, ka dibna loo gudbiyo golayaasha Baarlamaanka JFS sida ku cad Faqrada 2aad ee qodobka 7aad ee habraaca Magacaabidda Xubnaha Guddiga Madaxa bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.



Mudane Naga Guddon Salaan
Xil. Ali Yusuf Ali
Wasiirka Arimaha Gudaha, Federaalka iyo Dibuheshiisiinta

